

# SIDEE LOOGA HORTAGAA AMA LOO HAGAAA KALA WAREEGIDDA



Isla marka aad bilowdo inaad dib uga dhacdo bixinta lacagta amaahda/daynta ama Ogeysiis Isku-dar ah oo kala wareeg aad ka hesho Wakiil Dadweyne (Public Trustee), la xiriir Xafiiska Awood-siinta iyo Badbaadinta Maaliyadeed (Office of Financial Empowerment and Protection). Waxaan kuu tilmaami doonaa ilaha kala wareegidda iyo guriyaynta, iyo adeegyada kale ee taageeritaanka ee laga heli karo Denver.

Naga soo wac 720-944-2498 ama iimayl u soo dir [FEC@denvergov.org](mailto:FEC@denvergov.org) wixii caawinaad ah.

Xafiiska Denver ee Awooddaynta iyo Difaaca Dhaqaaleed, Qaybta Difaaca Dhaqaaleed ee Macaamiisha (Denver Office Of Financial Empowerment And Protection, Consumer Financial Protection Unit)

Xafiiska Denver ee Awooddaynta iyo Difaaca Dhaqaaleed ayaa siisa hagidda magaalada oo dhan shaqsiyaadka, qoysaska, iyo meheradaha yaryar oo ay ka mid yihiin:

- Ka caawinta ka-saaridda guryaha
- Kabidda kharashka guriga
- Caawinaada ijaarka
- Adeegyada sharciga
- Adeegyada dhexdhexaadin
- Difaaca dhaqaaleed ee macaamiilka (oo ay ka mid yihiin khayaanada dhaqaaleed iyo taageerada ka-saaridda guriga)
- Iyo adeeyo kale oo taageero

(Fadlan waxaad oogaataa: OFEP ma bixin karto mana bixinayso talo sharci, laakiin waxay ka caawin kartaa deganayaasha inay ku xiraan adeegyada sharciga ee bulshada.)

## ILOOYIN DHEERAAD AH EE KALA WAREEGIDDA

### XAFIISKA WAKIILKA DAD WAYNAHA

Wakiilka Dadweynaha waxay diiwaangelisaa dukumiintiyada la wareegidda guryaha oo waxayna u maamushaa si qaab hanaan sharci oo hufan. Wakiilka Dadweynaha ayaa hanaanka guri kala wareegidda u sharaxi kara milkiilayaasha; oo milkiilayaasha siiyaan liistada ilaha dibadda; milkiilayaasha guryaha u fidin kara macluumaad ku saabsan xalka la wareegidda guryaha; oo ay hayaan oo ay sii daayaan lacagaha dheeri ah ee la dagay. Wac 720-865-8400 ama emayl [foreclosures@denvergov.org](mailto:foreclosures@denvergov.org) wixii macluumaad dheeraad ah.

(Fadlan waxaad oogaataa: Wakiilka Dadweynaha milkiilayaasha guryaha ma siin karo talo sharciyeed, ma maarayn karo heshiisyada yareynta deyn, ama ma maarayn karaan rafcaan.)


### Denver Department of Housing Stability (Waaxda Xasiloonaata Guriyaynta Denver) (HOST)

HOST waxay siisaa ilo ka caawiya dadka deggan Denver inay helaan hoy cusub, ama ay sii joogaan gurigooda haatan, inay helaan hoy, inay bixiyaan kirada, yutilitiga, iyo biilasha moorgeejka, oo ay fahmaan nidaamka la wareegga iyo ka saaridda hoyga.

Wixii macluumaad oo dheeraad ah waxaad ka helaysaa [Denvergov.org/Housing](https://denvergov.org/Housing). Wac 720-913-1534 ama iimeel [housingstability@denvergov.org](mailto:housingstability@denvergov.org) si aad caawimo u hesho.

# Jadwalka Kala

**\*\* La xiriir Xafiiska Awooddaynta iyo Dhaqaaleed iyo Difaaca taageero iyo u diritaanka ilaha ku habboon adigoo wacaya 720-944-2498 ama iimeel u diriya [FEC@denvergov.org](mailto:FEC@denvergov.org).**



<sup>1</sup> Nidaamka xallinta waa wax soo mara Wakiillada Dadweynaha. Milkiilaha gurigu wuxuu dooran karaa inuu dhinac maro nidaamka isla markaana uu amaahda toos ugu celiyo amaahiyaha. Si kastaba ha noqotee, haddii taas la sameeyo, Xafiiska Wakiillada Dadweynaha ayaan dammaanad ka qaadi karin in hannaanka la wareegidda guryaha uu joogsan doono. Haddii mulkiilaha gurigu uu iska xaliyo isagoo u maraya Xafiiska Wakiilka Dadweynaha, xafiisku wuxuu dammaanad qaadayaa in hannaanka la wareegidda guryaha uu joogsan doono.